



Madaxtooyada Dawladda Puntland War-saxaafadeed

TIX/0019/2017
June 08, 2017

Shirkii Golaha Xukuumadda Dawladda Puntland ee khamiisaha ahaa, ayaa maanta waxaa looga hadlay arrimaha Amniga Puntland, Dastuurka Dawladda Federaalka ah iyo warbiximo

Xaaladda Amniga Dalka

Golaha Xukuumadda Dawladda Puntland ayaa sheegay inay xalay saqdii dhexe ay soo weerareen Burcad-diimeedka Al-shabaab deegaanka Af-urur ee buuralayda Gal-gala iyadoo weeraray xerro ciidan oo ku taal tuulada Af-urur, laakiin nasiib-daro markii ay ciidamadu iska caabiyeen wecrarkaas, waxay laayeen Burcad-diimeedku dad shacab ah oo daganaa deegaanka Af-urur oo iskugu jira odoyaal madax-dhaqameed ah, Dumar iyo Caruur, arintaas oo muujinaysa arxanddara Bur-cadaas, waxayna goluhu u taacsiyeeyeen dhammaan shacabkii halkaa lagu laayey, waxayna goluhu sheegeen in shar-wadayaasha caadadooda ay tahay markasta oo looga adkaado dagaalka inay shacabka laayaan.

Goluhu wuxuu caddeeyay in ciidanka mujaahidiinta ah ee Puntland iskaga filan yihiin Al-shabaab iyo cadowga Puntland, horeyna ay ugu dhiggeen taariikh lama ilaawaan ah, sidoo kale goluhu waxay sheegeen in Al-shabaab ka qoomameyn-doonto shacabka Puntland ee ay laayeen ee birri-mageydada ah, sidoo kale goluhu wuxuu caddeeyay in aan waxba ka jirin sheegashooyinka Burcad-Diimeedkaas

Goluhu wuxuu sheegay in Puntland iyo shacabkeedu ay ku filan yihiin difaaca dalkooda, ayna ka sifeyn-doonaan Al-shabaab meelaha ay Puntland uga dhumaaleysanayaan, isla markaana uu soo dhamaaday waqtiiqii Al-shabaab ay ku dhuumaaleysan laheeyeen gudaha Puntland,

Sidoo kale goluhu waxay ku dhawaaqeen in la abaal marin-doono Askartii ku dhimatay qaraxii Boosaaso iyo Askartii gacanta ku dhigtey qaraxyadii lagu qabtay Boosaaso iyo Gaalkacyo.